**War** saxaafadeed

# Alberta waxay cusboonaysiisay barnaamijka baaritaanka PCR ee KOOFID-19

Luulyo 12, 2022

Alberta waxay sii wadi doontaa inay siiso baaritaanka Falcelinta Silsiladda Polymerase (Polymerase Chain Reaction (PCR) KOOFID-19 ee dadka reer Alberta ee aadka ugu khatarta badan ee jirada iyo kuwa ku nool ama ka shaqeeya goobaha khatarta sare leh.

Laga bilaabo Luulyo 18, u qalmitaanka iyo isbeddellada hawlgalka ee barnaamijka baaritaanka PCR ayaa dhaqan geli doona. Baaritaano lagu wargelinayo goobaha daawaynta waxay u baahan doonaan u diritaan ka yimaadda xirfad-yaqaanka caafimaadka iyo meelaha baarista qaarkood ayaa isbeddeli doona.

"Waxaan qaadeynaa tillaabooyin aan ku dhiseyno aasaaska aan u dhignay wax ka qabashada fayrasyada kale ee neef-mareenka. Cusboonaysiintaan ku saabsan barnaamijkayaga baaritaanka PCR waxay gacan ka geysaneysaa fududeynta daryeelka ku dhow guryaha caafimaadka ee dadka Alberta, waxayna noo ogolaaneysaa inaan u hagno awooda baaritaanka dadka reer Alberta kuwa halista ugu jira, oo aan u ogolaano qaar ka mid ah shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee la geeyay xarumaha qiimeynta labadii sano ee ugu dambeeyay si ay ugu soo laabtaan doorkoodii caadiga ahaa si ay u taageeraan adeegyada kale ee caafimaadka."

*Jason Copping, Wasiirka Caafimaadka*

Xagaaga iyo deyrta, Alberta waxay filan kartaa inay aragto mowjadaha KOOFID-19 oo sii socda, oo ay weheliso gudbinta fayrasyada kale ee neefsashada sida hargabka. Waxaan jeclaan lahaa inaan xasuusiyo dadka reer Alberta muhiimadda ay leedahay la socodka calaamadaha, joogitaanka guriga marka jiran yihiin iyo, kuwa u qalma daawaynta, si dhakhso leh u galaan baaritaanka PCR marka ay jiran yihiin.

*Dr. Deena Hinshaw, Madaxa Caafimaadka*

### Qalabka qiimeynta Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) iyo goobaha baaritaanka

Aaladda qiimaynta khadka tooska ah ee Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) waxa ay sii wadi doontaa in loo isticmaalo qabsashada ballamaha goobaha Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) ee kuwa buuxiya

shuruudaha u-qalmitaanka, ku nool ama ka shaqeeya goobaha khatarta sare leh, ama uu soo gudbiyo xirfadle caafimaad.

Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) waxay sii wadi doontaa inay bixiso baaritaanka PCR ee xarumaha qiimeynta qaarkood. Bulshooyinka kale, baaritaanku waxa uu ka dhici doonaa rugaha Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) ee loo qoondeeyay inay yihiin meelaha wax lagu baaro, oo lagu dhex daray adeegyada kale.

Halka baaritaanka looga baahan yahay in lagu wargeliyo go'aamada daawaynta, daryeelka aasaasiga ah iyo xarumaha daryeelka degdegga ah waxay dooran karaan inay ku sameeyaan baaritaanka goobta ama waxay tixraaci karaan goobta Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS).

## U-qalmitaanka loo marayo gudbin takhtar

Laga bilaabo Luulyo 18, dadka reer Alberta u baahan baaritaanka PCR si ay ugu wargaliyaan daryeelkooda waxay u baahan doonaan u gudbin takhtar. Tan waxaa ka mid ah:

- Dadka leh calaamadaha laga yaabo inay u qalmaan daawaynta bukaan-socodka (outpatient treatment (Paxlovid or Remdesivir).
- Dadka leh calaamadaha uurka.
- Dadka loo soo gudbiyay baaritaanka taasoo qayb ka ah qiimeyntooda caafimaad.

Goobaha Caafimaadka waxay go'aamin doonaan ikhtiyaarka baaritaanka ugu fiican ee bukaankooda, taasoo ay ku jiri karto baaris degdeg ah guriga ama rugta caafimaadka, ku dhaqidda rugaha oo muunada loo diro shaybaarka si loogu baaro PCR ama u gudbin goobta Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) si loo baaro.

Dadka reer Alberta uu takhtarkoodu u gudbiyo goobta Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) waxay gelin doonaan magaca takhtarkooda aaladda qiimaynta takhtarkooduna wuxuu soo gudbin doonaa codsiga shaybaarka iyagoo magacooda ku hadlaya.

Dadka reer Alberta ee u qalma daawaynta bukaan-socod ee aan haysan bixiyaha daryeelka aasaasiga ah ama aan awoodin inay ballan qabsadaan waxay sii wadi karaan inay wacaan Khadka Caafimaadka (Health Link) 1-844-343-0971.

## U-qalmitaanka isu gudbinta

Dadka reer Alberta xaqa u leh ee ku nool ama ka shaqeeya goobaha khatarta sare leh waxay sii wadi karaan inay iskood u tixraacaan agabka qiimaynta Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS). Tan waxaa ka mid ah:

- Dadka leh calaamadaha ee ku nool ama ka shaqeeya goobaha go'doonka iyo goobaha fogfog ee xerooyinka Dadkii Hore, Inwit iyo Bulshooyinka Meytiis (First Nation, Inuit and Métis).
- Shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo daryeelka joogtada ah iyo shaqaalaha goobaha halista gudbinta sare ee gaarka ah sida xarumaha sixitaanka iyo hoyga.

Dadka ku nool ama ka shaqeeya goobaha go'doonsan iyo kuwa fog ee Dadkii Hore, Inwit iyo Bulshooyinka Meytiis (Nation First, Inuit and Métis) sidoo kale waxay sii wadan doonaan inay awoodaan inay ku galaan baaritaaka xaafadahooda.

Dadka ku nool ama ku jira goobaha khatarta gudbinta sare waxay sii wadan doonaan inay awood u yeeshaan inay ku galaan baaritaanka goobta ay joogaan.

### Baaritaanada degdega ah

Dhammaan baaritaanka degdega ah ee dadka reer Alberta, waxay sii ahaanayaan inay noqdaan qalab diyaar ah oo ku habboon is-ogaanshaha. Xirmooyinka baaritaanka degdega ah ee lacag la'aanta ah ayaa diyaar u ah dhammaan dadka reer Alberta iyada oo loo marayo boqolaal farmasiyo ah oo ku yaal gobolka.

## Xog la xiriirta

- Calaamadaha iyo baaritaanka KOOFID-19 (COVID-19 symptoms and testing)
- Allada isku qiimeynta ee Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS assessment tool)

## Weydiimaha warbaahinta

**Steve Buick**
780-288-1735
Xoghayaha Sare ee Saxaafadda, Caafimaadka




Classification: Public